

11. Ee Dadku muu jiidho Jiirta.

فَلَا أَقْنَحُمُ الْعَقَبَةَ ﴿١١﴾

12. Ma taqaannaa Jiirta.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْعَقَبَةُ ﴿١٢﴾

13. Waa qoor la xoreeyo.

فَكَرْبَةُ ﴿١٣﴾

14. Iyo cunno la siiyo maalin gaajo.

أَوْ لَطَعْنِي فِي يَوْمِ ذِي مَسْجَبٍ ﴿١٤﴾

15. Agoon kuu dhaw.

يَتِيمًا ذَا مَقْرَبَةٍ ﴿١٥﴾

16. Ama Miskiin Dhulka ku dhagay  
(dhibaato darteed).

أَوْ مَسْكِينًا ذَا مَتْرَبَةٍ ﴿١٦﴾

17. Markaas la noqdo kuwa Ru-  
meeyay xaqa, isuna dardaarma Samir-  
ka, isuna dardaarma naxariista.

ثُمَّ كَانَ مِنَ الَّذِينَ آمَنُوا وَتَوَصَّوْا

بِالصَّبْرِ وَتَوَصَّوْا بِالْمَرْحَمَةِ ﴿١٧﴾

18. Kuwaasina waa kuwa Midigta  
mari.

أُولَئِكَ أَحْسَبُ الْأَيْمَنَةَ ﴿١٨﴾

19. Kuwaka Gaaloobayse Ayaad-  
kannaga waa kuwa jidka xun mari.

وَالَّذِينَ كَفَرُوا بِآيَاتِنَا هُمْ أَصْحَابُ الْمَشْأَمَةِ ﴿١٩﴾

20. Waxaana lagu dabooli Naar.

عَلَيْهِمْ نَارٌ مُّؤَصَّدَةٌ ﴿٢٠﴾

Qiiimaha noloshu waa in Ruuxu halgamo xaqana raaco, dhibka halgankaasna u adkaysto, Dadka goommoonna wax ku taro, Gaar ahaan Agoonta iyo Masaakiinta, si markaas Ruuxu ugu mid noqdo kuwa sama falay ee samirka iyo naxariista is fara, Jidka wanaagsanna qaada xumaanna ka taga.

Rasuulkuna wuxuu yidhi «Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee: «Ruuxaan U Naxarriisaniin Kaannaga yar Oqoonsanninna xaqa ka wayn, naga mid ma aha». Waxaa wariyay Abuu Daawuud. Al-Balad (11-20).

## Suurat Ash-Shams

## سُورَةُ الشَّمْسِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee  
naxariis guud iyo mid gaaraba naxariis-  
ta.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Qorraxda  
iyo Barqinkeeda.

وَالشَّمْسِ وَضُحَاهَا ﴿١﴾

2. Iyo Dayuxu markuu Qorraxda raa-  
co.

وَالْقَمَرِ إِذَا لِلهَا ﴿٢﴾

3. Iyo Maalintu markay ifiso.

وَالنَّهَارِ إِذَا تَجَلَّىٰهَا ۝٣

4. Iyo Habeenku markuu daboolo (madoobaado).

وَاللَّيْلِ إِذَا يَغْشَىٰهَا ۝٤

5. Iyo Samada iyo say u dhisantahay.

وَالسَّمَاءِ وَمَا بَنَىٰهَا ۝٥

6. Iyo Dhulka iyo suu u fidsanyahay.

وَالْأَرْضِ وَمَا خَلَقَ ۝٦

7. Iyo Nafta iyo sida Eebe u ekeeyay.

وَنَفْسٍ وَمَا سَوَّاهَا ۝٧

8. Una tusiyay Jidka xun iyo ka Eebe kayaabiddaba.

فَأَلَّهَمَّهَا جُجُورَهَا وَتَقَوَّاهَا ۝٨

9. Ee waxaa liibaanay Ruxii Naftiisa Daahiriya.

فَدَافَلَحَ مِنْ رُكْنَيْهَا ۝٩

10. Waxaana khasaaray Ruuxii Naf-tiisa xumaan dhex galiya.

وَقَدْحَابٍ مِنْ دَسَنَيْهَا ۝١٠

11. Thamuud waxay beeniyeen (xaqii) kibir dartiis.

كَذَّبَتْ ثَمُودُ بِطَغْوَنِهَا ۝١١

12. Marku tagay koodii xumaa (si uu hashu u dilo).

إِذْ أَنْبَعَتْ أَشْقَنِهَا ۝١٢

13. Oo Rasuulkii Eebana ku yidhi, iska daaya Hasha Eebe iyo Cabbideeda.

فَقَالَ لَهُمْ رَسُولُ اللَّهِ نَاقَةَ اللَّهِ وَسُقْيَيْهَا ۝١٣

14. Wayna beeniyeen Rasuulkii Hashiina way Dileen markaasaa Eebe si daran u caddibay Dambigooda dartiis.

فَكَذَّبُوهُ فَعَقَرُوهَا فَدَمْدَمَ

عَلَيْهِمْ رَبُّهُمْ بِذُنُوبِهِمْ فَسَوَّاهَا ۝١٤

15. Isagoon Eebe ka yaabaynin cidhib (iyo wax yeello).

وَلَا يَخَافُ عُقْبَىٰهَا ۝١٥

Eebe wuxuu ku dhaartay Todobo Arrimood oo Suuraddan ka mid ah, in Ruuxii xaqa ku toosnaada uu liibaani, kii Jidka xun qaadana uu khasaari, isla waynida Dambiga, iyo xaq-diidnimaduna sabab u noqoto Halaag iyo ciqaab.

Rasuulkuna wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee»: «Ruux kasto oo la dhalo waxaa lagu dhalaa Fidrada (Islaamka). waxaa kale oo uu dhihi jiray isagoo sujuudsan: «Eebow sii Naftayda Cabsideeda, Daahirna yeel'adaa u khayr badan ku wax Daahiriyeed, Adigaa wali u Ah Sayidkeedana ah». Waxaa wariyay Imaam Axmed. Ash-Shams (1-15).